



Adeeg bixiyaha Daryeelka Carruurta ee Qaaliga ahoow,

Bilowga sanadkaan waxay u badan tahay inaad heshay iimeel iyo iimeel lagaaga codsanaayo inaad ka qaybqaadato Xog aruurinta Qiimaha Suuqa 2021 ee adeeg bixiyaasha daryeelka ilmaha. Fariintaan waxay keliya ku xasuusinaysaa inaad fadlan buuxiso xog aruurinta kahor inta aadan la xirin. Jawaabahaagu aad ayay muhiim u yihiin! Waxay [Waaxda Waaxda Carruurta, Dhalinta, iyo Qoysaska ee Gobalka \(Department of Children, Youth, and Families \(DCYF\)\)](#) ka caawiyaan inay dejiyaan lacagta kharashaadka daryeelka ilmaha ee Working Connections ayadoo lagu saleynaayo qiimaha adeeg bixiyaashu ka qaadaan qoysaska sida iskood ah lacagta iskaga bixiya.

Xog aruurintaan waxay qaadataa 10 daqiiqo waxaana la sameyn karaa ayadoo la adeegsanaayo oonleenka ama taleefan:

- **Si aad xog aruurinta oga jawaabto oonleen ahaan adoo adeegsanaaya (Ingiriis, Soomaali, ama Isbaanish, guji hoos:**

**Ku samee Xog aruurinta Oonleen!!**

**Si aad xog aruurinta ugu sameyso taleefan, fadlan wac:**  
**(360) 312-3693 (Ingiriis) | (360) 312-3694 (Soomaali) | (360) 312-3695 (Isbaanish)**

Si aad xog aruurinta ugu qaadataa si fudud oo dhaqso ah, waxaan kuusoo jeedinaynaa inaad soo qaadata lamabarka Aqoonsiga adeeg bixiyahaaga ee aqoonsiga ka haysta DCYF iyo buug yaraha goobtaada (oo ay ku qoran yihiin qiimaha aad ka qaado qoysaska sida iskood ah iskaga bixiyaha lacagta).

Macluumaadka aad bixiso waa qarsoodi ka qaybqaadashada xog aruurintana waa ikhtiyaari. Go'aankaaga ku aadan ka qaybqaadashada wax saameyn ah kuma yeelanaayo inaad bixiso daryeelka ilmaha kaalmada hela. Warbixin kasta oo laga soo saaro xog aruurintaan laguma soo daraayo magacaaga ama magaca ganacsigaaga.

Xarunta Jaamacada Western Washington ee lagu barto Dhaqaalaha iyo Cilmi baarista ayaa ka caawinaysa in DCYF sameyso xog aruurintaan. Haddii aad wax su'aalo ah qabto, fadlan kala soo xariir [cebr@wwu.edu](mailto:cebr@wwu.edu) ama 360-350-3909.

Haddii aad jeclaan lahayd in lagaa caawiyo buuxinta xog aruurinta fadlan la xariir **Tababarahaaga Ilaha Daryeelka Ilmaha (Child Care Resources Coach)**. Haddii aadan haysan tababaraha Ilaha Daryeelka Ilmaha, fadlan wac Laanta Ilaha Daryeelka Carruurta adoo ka wacaaya Laynka Taageerada Daryeel bixiyaasha oo ah 1-800-446-1114.

**Kadib 8 da Maayo, CCR waxay si bakhtiyo nasiib ah u dooran doontaa 10 adeeg bixiyaal (oo buuxiyay xog aruurintaan) waxayna u diri doontaa buugaagta carruurta oo qiimahoodu yahay \$100. Dhiirigelintaan waxaa *si toos ah u sameeyay CCR, ma aysan sameyn DCYF*. Haddii adeeg bixiyuhu uu horey u buuxiyay xog aruurinta, wali waxa uu u qalmayaa inuu helo buugaagta haddii la doorto.**